

**SIYAASADDA  
DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE  
XEERKA ASLUUBTA ARDAYDA KA QEYBGASHA HAWLAHA  
MANHAJKA DHEERAADKA AH  
Ogolaashada Guddiga**

**Falsafada**

Westerville City School District Board of Education (Guddiga Waxbarashada Dugsiga Magaalada Westerville) wuxuu aqoonsan yahay in isticmaalka iyo badsashada kiimikada ka dhexeyso ardayda tahay dhibaato culus. Cilmi baarista waxay muujisay in isticmaalka mukhaadaraadka iyo qamrada ay dhibaato u geysato caafimaadka madaxa, jirka iyo shacuurta ardayda. Cilmi baarista waxay kaloo muujisay in tubaakada tahay wax loo barto oo dhibaato u geysata caafimaadka jirka ardayga. Sidaas darteed, Guddiga wuxuu aaminsan yahay in loo baahan yahay in sharciyada qamrada, tubaakada iyo mukhaadaraadka kale loo sameeyo dhamaan ka-qeybgaleyaasha manhajka dheeraadka ee arday ahaan ugu qoran Dugsiyada Westerville. Kaddib, Guddiga Waxbarashada waxay fileysaa in ardayda isitmaalaan garasho wanaagsan iyo in aysan tagin meelaha asxaabta ku haayso qamrada iyo mukhaadaraadka kale.

Ujeedada barnaamijka manhajka dheeraadka ah waxay tahay in ka-qeybgale kasta la siiyo fursad uu ku koro maskax ahaan, damiir ahaan, jir ahaan, iyo shacuur ahaan. Ardayga ka qeybgalo hawlaha manhajka dheeraadka ah waxaa laga filaa in uu u dhaqmo hab muujisa wanaagga muwaadiniinta iyo sharaf u soo jiida naftiisa/nafteeda, qoyska qofka, dugsiga iyo bulshada, ha ahaato gudaha fasalka, marka uu ku sugan yahay ama uusan ka baxsaneyn bandhigga ama goobta atleetikada, sida xubin ka tirsan naadiga dugsiga, ha ahaato waqtiga xilliga iyo waqtiga ka baxsan xilliga.

Si loo hubiyo in barnaamijka bixin karo fursadahaan, waxaa loo baahan yahay heerka dishibiliinka ka-qeybgale kasta. Dishibiliinka qofka wuxuu ku lug leeyahay sharciyada iyo xeerka la xariira dabeecadda qofka iyo sharciyada kaalmeeya xukunka bulsho madani ah. Ardayda ka-qeybgasha manhajka dheeraadka ah ee ka qeybgala falal aan waafaqsanayn falsafadaan waxay lumin doonaan axsaanka loo sameyay in ay mattalaan dugsigooda. Ka-qeybgalka hawlaha manhajka dheeraadka ah ma aha xaq la leeyahay, balse waa axsaan. Kaddib, dhamaan ardayda ka qeybgasha hawlaha manhajka dheeraadka ah waqti kasta waa in ay la kulmaan sharciyada soo socda inta uu socdo sannad dugsiyeedka iyo xilli kasta dhamaan goobaha. In aan loo hoggaansamin sharciyada waxay carqalad gelin kartaa shaqada manhajka dheeraadka ah oo idil ee ardayga.

Siyaasaddaan waa meel ay isugu yimaadaan Student Code of Conduct (Xeerka Asluubta Ardayga) uu Guddiga ku dhaqmo.

**Ogolaashada Munaasabadaha Dugsiga**

Ohio Capital Conference (Shirka Caasimadda Ohio) waxay dajisay kharashka ku baxa gelitaanka munaasabadaha atleetikada sannad dugsiyeedka kasta. Khidmadaha ogolaashada masraxa ama hawlaha kale dugsiga waxaa dajiya naadiga ama urur kale. Waxaa la dhiirgeliyaa iskuduwidda dhamaan Dugsiyada Dhexe iyo Dugsiyada Sare.

**A. Xaq u Yeelashada Manhajka Dheeraadka ah**

Fursadda in hawsha manhajka dheeraadka la mattalo Westerville City Schools waa axsaan. Go'aanka ugu dambeeyo xaq u yeelashada waxaa iskaleh dugsiga iyo/ama Ohio High School Athletic Association (Ururka Atleetikada Dugsiga Sare Ohio). Go'aanka in loo ogolaado ka-qeybgaleyasha waxaa iskaleh dugsiga iyo tababaraha/la-talliyaha hawl kasta. Arday kasta waxaa lagu soo dhaweyaa in uu iskudayo hawsha manhajka dheeraadka ah haddii isaga/iyada la kullanto habka soo socdo. Ardayda waa in ay:

1. Xaq u yeeshaan sida hoos timaado sharciyada iyo xeerka Ohio High School Athletic Association (Ururka Atleetikada Dugsiga Sare Ohio) marka lagu dabaqi karo.
2. Marka loo baahdo, la kaalay Ohio High School Athletic Association Pre-Participation Physical Examination Form (Foomka Baaritaanka Jirka Ka-Qeybgalka Ka Hor Ururka Atleetikada Dugsiga Sare Ohio) kana mid ah saxiixa waalidka, saxiixa ardayga iyo saxiixa takhtarka kuna qoran taariikhda baaritaanka caafimaadka ugu dambeyay, iyo macluumaadka looga baahan yahay liiska xaq u leeashada.
3. Soo gudbi warqadaha xogta oo dhamays tiran, foomamka ceymiska iyo degdegga; Gaar isku celceliska dhibicda darajada ugu yar (GPA) ee 1.75 rubac kasta muddada darajo bixinta ee in yar ka horeyso ka-qeybgalka hawsha iyo ku gudub shan (5) buundo; bilowga horaanta qaboobaha (fall)ma qabaan GPA ugu yar hase ahatee (sida waafaqsan OSHAA) waa in ay gudbaan ugu yaraan shan (5) maado muddada qeybta 4<sup>aad</sup> sagaalka todobaad ee darajada 8<sup>aad</sup>.
4. Loo hoggaansamo District's Code of Student Conduct (Xeerka Asluubta Ardayga ee Degmada), Code of Conduct for Students Participating in Extracurricular Activities (Xeerka Asluubta Ardayda ka Qeybgasha Manhajka Dheeraadka ah iyo Tobacco/Drug/Alcohol Policies and Procedures (Siyaasadaha iyo Hababka Tubaakada/Mukhaadaraadka/Qamrada);
5. La tago dugsiga ugu yaraan ½ maalin maalinta tartanka/munaasabadda marka munaasabadda ku soo aado maalin dugsiiyeed;
6. Loo hoggaansamo sharuudaha xaq u yeelashada Ohio High School Athletic Association (Ururka Atleetikada Dugsiga Sare Ohio).

Tilmaamaha Xaq u Yeelashada Manhajka Dheeraadka aan Caadiga Ahayn

Ardayda ku qoran koorsada aan hiddaha la soconin kana mid ah balse ku ekeen: koorsada internetka si loo soo ceshado buundada ama dedejinta buundada, iyo fursadaha la ogol yahay Credit Flex (Maadooyinka Ardayga Doorto), waa in ay la kulmaan sharuudaha xaq u yeelashada Westerville City Schools iyo Ohio High School Athletic Association.

1. Ardayga ma isticmaali karo fursadda "Test-Out" (Imtixaanka-Dibadda) koorsada si uu xaq ugu yeesho ka-qeybgalka manhajka dheeraadka ah.
2. Ilaa laga dajiyo taariikh bilow ah ama dhamaad oo waafaqsan muddada darajo bixinta Guddiga xagga koorsooyinka aan hiddaha la soconin ka hor inta ardayga uusan bilaabin koorsada, koorsada aan hiddaha la soconin waxaa lagu miisaami doonaa ku dhufashada "1" si loo ogaado la mid ahaashada loo baahan yahay xaq u yeelashada manhajka dheeraadka. Koorsada aan la soconin hiddaha dhamaadka taariikhda waxay isticmaali doonaan OHSAA Guidelines for Student Athletic Eligibility (Tilmaamaha OSHAA ee Xaq u Yeelashada Atleetikada Ardayga) si loo ogaado xaq u yeelashada.
3. Ka hor inta aan la bilaabin koorsada aan la soconin hiddaha, kormeeraha waxyaabaha aan atleetikada ahayn ee manahajka dheeraadka ah ama agaasimaha atleetikada/hawlaha wuxuu gaari doonaa horumar loo baahan yahay in la cabbiro marka la gaaro dhamaadka muddada

darajo bixinta Guddiga qaadatay si loo ogaado xaq u yeelashada. Dhamaan qorshooyinka xaq u yeelashada waa in ay ogolaasho kama dambays ka haystaan kormeeraha hawsha manahajka dheeraadka aan ahayn atleetikda ama agaasimaha arleetikada/hawlaha.

4. Haddii ardayga dhamaystiro koorsada aan hiddaha ahayn ka hor inta aan la gaarin muddada darajo bixinta, iyadoo aan la fiirin taariikhda dhamaadka la qabtay (haddii lagu dabaqi karo) koorsada, ardayga ma tirsan karo shaqada koorsada si uu xaq ugu yeesho muddada darajo bixinta kaddib marka la dhamaystiro koorsada.

#### **B. Khidmadaha/Sharciyada**

Ardayga waa in ay u hoggaansamaan "Code of Conduct for Students Participating in Extracurricular Activities" (Xeerka Asluubta Ardayda Ka Qeybgasho Hawlaha Manahajka Dheeraadka ah). Hawl kasta, madaxa tababarka/la-talliyaha wuxuu qabaa tiro sharciyo qoran. Koobiyada sharciyadaan waxaa loo qeybin doonaa arday kasta. Ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyayaasha waxay saxiixi doonaan foomka lagu aqoonsado la socoshada sharciyada iyo ciqaabta ka dambeyso marka la jebiyo. Dhamaan ardayda loo xusho kooxaha/naadiyada dugsiga sare waxaa looga baahan yahay khidmadda Pay-To-Participate (PTP - Bixi-Si-Aad-Uga-Qeybgashid). Khidmadda PTP waa in la bixiyo maalinta tobanaad oo laga qeybgalo sida u qoran OHSAA, ama taariikhda hawsha kowaad, meeshii lagu dabaqi karo. Ardayda waa laga saari doonaa hawsha kooxda/naadiga haddii aan la haynin lacag lagu bixiyo.

#### **Abaal Marrinta Wargadaha**

Si loo siiyo warqadda mattalaadda Dugsiyada Magaalada Westerville, qaataha waa in uu la kulmo ugu yaraan, dhamaan heerarka xaq u yeelashada Ohio High School Athletic Association (Ururka Atleetikada Dugsiga Sare Ohio) iyo Westerville City Schools (Dugsiyada Dadweynaha).

Atleetikada ku lug leh barnaamijka Westerville Special Olympics (Olimbikada Gaarka Westerville) waxaa loo samayn doonaa fududeyn gaar ah.

#### **Jujuubka:**

Waa mamnuuc hawlaha jujuubka nooc kasta iyo waqti kasta. Ardayga ma qorsheyn karo, ma dhiiri gelin karo, ama kuma kici karo jujuub. Jujuubka waxaa lagu sifeyaa marka lagu dhaqaaqo fal ama qof kale lagu qasbo, sida dhibanaha, in uu ku kaco fal kasta oo bilow u ah fasal kasta, koox ama urur taasoo sababta ama qof kasta ama qof kasta ku abuurta halista dhibaataada madaxa ama jirka. Ogolaashada, fasaxa, ama qaadashada halista uu qaato qof kasta oo loo geysto jujuubka, ma yareyn doonto mamnuuca. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, fiiri buugga dugsiga [District Code of Student Conduct, Item 19 (Xeerka Dabeecadda Ardayga ee Degmada, Qodobka 19)].

#### **Luminta Axaanka Hawsha Manhajka Dheeraadka ah**

Macnaha "luminta axsaanka hawsha kmanahajka dheeraadka ah" waxaa loola jeedaa ka saaridda qaar ka mid ah hawlaha manahajka dheeraadka ah uu ardayga ka qeybgalo ama xaq u leeyahay in uu ka qeybgalo. Ka reebidaan waxaa caadi ahaan lagu dabaqaa ku-celcelinta, ku celcelinta fanka, safarada dibadda, tartanka iyo dhamaan hawlaha kale ee la xariira hawsha (hawlaha) manhajka dheeraadka ah.

Luminta axsaanka hawsha manhajka dheeraadka wuxuu toos ula socdaa dhamaan maalmahaka joojinta ama ka saaridda. Kaddib, luminta axsaanka hawsha manahajka dheeraadka ah waxaa loo fullin doonaa sida talaabo dishibiliin gaar ah haddii ardayga laga joojin doono ama la saari doono. (Fiiri Qeybta II, hoos)

**Ardayda ku jirta sannadka waxbarashada kowaad dugsiga sare WCS ama dugsiga dhexe ee** ku sugan xaalad looga joojiyay ka-qeybgalka, taasoo ugu wacan jebinta xeerka, waxay ka-joojintooda ku qaadan doonaan hawsha iminka u socota/midda xigta. Dhamaan ardayda kale ee laga joojiyay ka-qeybgalka, taasoo ugu wacan jebinta xeerka, looma ogolaan doono in ay guttaan ka-joojintooda in ay ka-qeybgalaan hawsha manahajka dheeraadka ah marka kowaad.

### Qaaraanka

Dhamaan mashaariicda qaaraanka waa in uu soo ogolaado agaasimaha ama qofka uu isaga/iyada soo magacaabo.

### Isticmaalka Mukhaadaraadka, Qamrada iyo Tubaakada

#### Qeybta I - Sifeynta

Xagga ujeedooyinka Siyaasaddaan, qodobadaan waxaa loo sifeyaa sida soo socoto:

1. Qamrada - Qamrada culus, fiino, biir ama maado kasta oo laga helo sakhrad.
2. Barnaamijka Kaalmada - Waxaa dhici karto in ardayga laga dalbado in uu sameeyo mid ama ka badan kuwa soo socdo:
  - a) Tago shirka faragelinta ee lala yeesho kooxda taageerada ardayga. Waxaa si xoogan loo dhiirigeliyaa ku lug yeelashada waalidka ama ilaaliyaha.
  - b) Raaco talooyinka ay soo jeediso kooxda taageerada ardayga.
  - c) Dhamaystiro qiimeyn laga qaato wakaalad la ogol yahay xagga dhibaatooyinka kiimikada ee suurtogalka ah.
  - d) Dhamaystiro barnaamijka daweynta uu ku talliyo qiimeyaha;
3. Hawlaha Manahajka Dheeraadka ah - Waxyaabaha la raaco ee dibadda ka ha fasalka ee laga yaabo in ay xariir la leeyahiin ama in aysan la lahayn fasal khaas ah, halkaas ay ardayda ka helaan madax banaani xagga xulashada iyo ka-qeybgalka, mana jirto darajo ama buundo lagu qaato aqoonta.
4. Mukhadaraadka - Maado kasta oo maandoorisa, kana mid ah, balse ku ekeen, mukhaadaraadka sharci darrada, xashiishka, steerooidka baddala jirka, dawooyinka sharciyan la soo qoro kuwa laga iibsado miiska ama la haysto ama si aan la ogoleyn loo qeybiyo iyo maadooyinka la alifo (kuwa u ek).
5. Maadooyinka Baddala Caatifadda - Waxaa ka mid ah, lana xaddidin, maan dooriyaha, kuwa jebiya niyadda, kiciyeyaasha, waalida, dawooyinka been abuurka, hashiishka iyo dawooyinka la qoro, haddii uusan soo qorin takhtar shatti u haysto laguna haynin weelka asalka, weelkaas oo loo baahan yahay in uu sheego magaca ardayga iyo tilmaamaha sida wanaagsan loo adeegsado.
6. Waalidka/Ilaaliyaha - "Waalid" waxaa loola jeedaa waalidka ardayga ka-qeybgala haddii xuquuqda waalidka aan lagu soo koobin ammar ka soo baxay maxkamadda ama heshiis lagu gaaray sharciga; ilaaliye, ama haayaha sharciyeysan.
7. Ka-Joojinta Joogtada ah - Inta ka hartay waqtiga aqoonta ardayga u ka qaato hawlaha manhajka dheeraadka ah.

8. Racfaanka - Ardayga wuxuu soo gudbin karaa codsi in uu dib ugu soo noqdo hawsha manhajka dheeraadka ah marka uu ogeysiis qoran u soo gudbiyo agaasimaha dhismaha ama qofka uu isaga/iyada magacaabay. Ogeysiiska waxaa ka mid ah jebinta, hawsha iyo fikradda loo baahan yahay in la tixgeliyo.
9. Haysashada - Qamrada, tubaakada, maadada la kantaroolo (sida ku sifeysan Ohio Revised Code Section (Qeybta Xeerka La Baddalay ee Ohio) 3719.01), ama qalabka mukhaadaraadka laga helokorka ama jirka ardayga, ama ku dhex jira hantidiisa (tusaale ahaan: jaakada, boorsada dhabarka, baabuurka, lokarada, lokarka la qeybsado (iwm.)
10. Sannad Dugsiyeedka - Sannad dugsiyeedka waxaa lagu sifeyaa sida maalinta rasmiga kowaad ee dugsi/xilliga ilaa laga gaaro maalinta rasmiga ugu dambeyso dugsi/xilliga sida uu u soo bandhigay Guddiga Waxbarashada Westerville.
11. Dhererka Xilliga - Xilliyada atleetikada waxaa lagu tilmaamaa in ay yahiin Horaanta Qaboobaha (Fall), Qaboobaha (Winter), iyo Bilowga Kuleylaha (Spring) Xilliyada hawsha manhajka dheeraadka ah waxaa siferya samastar kasta.
12. Is-xaadirinta - Iska-xaadirinta agaasimaha, agaasimaha atleetikada/hawlaha iyo/ama madaxa tababaraha/la-talliyaha hawsha dugsiya, ma aha in loo adeegsado si leysaga ilaaliyo ciqaabta jebinta xeerka. Jebinta Sharciga horay loo soo sheegay ama jebinta weli socota ma noqon karaan "is xaadirin." Ardayda waxay is xaadirin karaan hal mar keliya inta ay socoto shaqadooda dugsiya (fiiri Qeybta II, Sharciyada, Qodobka #1, hoos). Is xaadirinta waa in la soo sheego maalin dugsiyeedka xiga, dhacdada kaddib. Ardayga isma xaadirin karo haddii boliiska soo farageliyo dhacdada.
  - a) Ardayga wuxuu kaalmo ka raadsan karaa barnaamijka dugsiya loo ogolaaday dhibaatooyinka mukhaadaraadka/qamrada. Maamulaha ama qofka loo magacaabo wuxuu dajin doonaa sharuudaha loo baahan yahay joojinta barnaamijyada mukhaadaraadka/qamrada.
  - b) Waxaa la tixgelin doonaa is xaadirinta la xariirta jebinta kowaad. Lama qiimeyn doono yareynta xilliga ama hawsha haddii ardayga waafaqo in uu raaco habka kaalmada ardayga.
  - c) Tixraaca waalidka/ilaaliyaha ama saaxiibka waxaa loo qaadan doonaa sida is xaadirin.
  - d) Hadii ardayga ku fashalo in uu dhamaystiro kaalmada iyo daweynta, ciqaabta waxaa loo hirgelin doono si buuxdo.
  - e) Waa la qiimeyn doonaa is xaadirinta, waxaana ogolaan doono maamulaha. Ogolaashada waxay ku xeran tahay taariikhda ka-qeybgalkii hore iyo diiwaanka dishibilliinka.
13. Badsashada Maadada - Isticmaalka mukhaadaraadka ama qamrada taasoo jebisa sharciga deegaanka, gobolka ama federaalka ama jebisa siyaasadda dugsiya.

### **Qeybta II - Hababka Dishibiliinka**

#### **Jebinta Sharciyada**

1. Marka ardayga jebiyay ama la tuhunsan yahay in uu jebiyay sharci, waxaa la ogeysiin doonaa agaasimaha (qofka loo magacaabay).
2. Waxaa dhici karto in ardayga si ku meel gaar ah uu hawsha uu ka saaro agaasimaha/qofka loo magacaabo, maareyaha atleetikada/hawlaha, tababaraha ama la-talliyaha mas'uulka ka ah kormeerka hawshaas.

3. Si loo baaro jebinta, waxaa kulmi doono guddiga fiirinta oo ka kooban tiro aan ka yareen tababaraha ama la-talliyaha iyo agaasimaha ama qofka loo magacaabo ama shaqaale kale oo loo haysto in uu ku habboon yahay. Haddii guddiga fiirinta la tahay in loo baahan yahay in la qaado talaabo ka baxsan ka-saaridda ku meel gaarka, agaasimaha ama qofka loo magacaabay wuxuu u sheegi doonaa ardayga iyo waalidka/ilaaliyaha jebinta iyo ciqaabta suurtoogalka ah.
4. Ardayga waxaa lala yeelan doonaa dhageysi aan rasmi ahayn.
5. Jebinta waxaa lagu gaari doonaa sida ku saleysan caddeyn muuqata iyo/ama muhiimad leh. Si loo qiimeeyo caddeynta, agaasimaha ama qofka uu u magacaabay iyo/ama guddiga fiirinta waxay qaadi karaan talaabo kasta oo macquul ah, sida balse ku ekeen, kuwa soo socda:
  - a) Baarista jebinta la soo sheegay ka hor inta aan la qabanin dhageysiyada;
  - b) Xaqiijinta caddeynta lagama maarmaanka u ah dhageysiyada;
  - c) Abuurista diiwaanada ilaha caddeynta ama xaqiijinta caddeynta;
  - d) La tashiga shaqaale kale oo ka tirsan Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville.
6. Agaasimaha dhismaha/qofka loo magacaabo wuxuu ogeysiin doonaa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha go'aanka la gaaray.
7. Go'aanka waxaa laga qaadan karaa racfaan loo gudbiyo Maamulaha ama qofka loo magacaabo.
8. Inta uu socdo racfaanka, ardayga wuxuu sii wadan kara hase ahatee kama qeybgeli karo hawl rasmi ah inta la sugaayo natiijada ka soo baxdo dhageysiga uu fulliyo Maamulaha ama qofka loo magacaabo. Go'aanka Maamulaha ama qofka loo magacaabay waa kama dambays.
9. Ciqaabta waxaa lagu dabaqi doonaa dhamaan hawlaha manhajka dheeraadka ah uu ardayga ka qeybgalo inta ay socoto muddada ciqaabta.

### **Qeybta III - Sharciyada iyo Ciqaabta la Qoray**

Ka-qeybgaleyaasha waxaa lagula tallin doonaa buugga ardayga/galka dhamaan sharciyada ka hor inta aysan ka soo qeybgelin si arday kasta uu u go'aansado suurtoogalka ka-qeybgalkiisa/ka-qeybgalkeeda.

Si loo gaaro ballanka ardayda ka-qeybgasha, tababare/la-talliye kasta wuxuu sharaxi doonaa Extracurricular Activities Code of Conduct (Xeerka Asluubta Hawlaha Manhajka Dheeraadka ah) ka hor inta aan la gaarin tartanka/munaasabadda.

SHARCIGA I. Lama ogola isticmaalka, xumaanta, iibsiga, ama haysashada mukhaadaraadka ama qamrada.

SHARCIGA II. Lama ogola gudbinta, iskudayidda gudbinta ama iibinta mukhaadaraadka ama qamrada.

SHARCIGA III. Lama ogola isticmaalka, iibsiga, haysashada ama gudbinta tubaakada nooc kasta.

Waxaa dhici karto in ardayda laga dhaafo isticmaalka mukhaadaraadka Sharciga 1aad haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha soo bandhigaan oraaq qoran oo tilmaanta diidmada ay ka qabaan taasoo la xariirta diinta, asbaabta caafimaadka, ama xaalad itaal darri. Dhamaan ka dhaafidda

waa in uu soo ogolaado Kormeeraha ama qofka uu magacaabo.

1. Dhamaan ciqaabta sharciyada kore waxay ahaan doonaan kuwo leysu geeyo ilaa laga gaaro maalin dugsiyeedka ugu dambeeyo rasmi ahaan muddada mid kasta oo ka mid ah saddaxda (3) qeyb waxbarasho.
  - a) Darajooyinka K ilaa 5;
  - b) Darajooyinka 6 ilaa 8;
  - c) Darajooyinka 9 ilaa 12.
2. Waxaa dhici karto in aan ciqaabta loo fullinin iyaga oo wada socda.

#### **Qeybta IV - Ciqaabta**

SHARCIGA I. LAMA OGOLA ISTICMAALKA, XUMAANTA, IIBSIGA, AMA HAYSASHADA MUKHAADARAADKA AMA QAMRADA.

##### Jebinta Kowaad

1. Ardayga jebiya waxaa laga mamnuuci doonaa ka-qeybgalka hawlaha manhajka dheeraadka ah muddo hal (1) sanno dugsiyeed laga billaabo taariikhda jebinta.
2. Haddii ardayga geystay jebinta waafaqo in uu raaco barnaamijka kaalmada mukhaadaraadka/qamrada ama in uu tago barnaamijka qiimeynta iyo daweynta mukhaadaraadka/qamrada dugsiga ogolaaday, kaasoo uusan maal gelinin Dugsiga Degmada Magaalada Westerville, ciqaabta waxaa boqolkiiba labaatn (20% tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeyso OHSAA), lagana dhimi doono hawsha manhajka dheeraadka ah ee iminka socoto ama hawsha xigta ee ka baxsan manhajka ama xilliga sida waafaqsan go'aanka agaasimaha ama qofka uu isaga/iyada magacaabay ama maareyaha atleetikada/hawlaha. Tusaale ahaan, haddii hawsha lala kulmo todobaadka ugu dambeeyo xilliga ama hawsha, ciqaabta waxay sii socon doontaa xilliga lagu jiro ilaa xilliga ama hawsha ku xigta. Ardayga wuxuu ka qeybgeli karaa balse kama tartami karo/fullin karo kooxda ama kooxda balaaran waqtiga ka-joojinta. Agaasimaha ama qofka loo magacaabay ayaa go'aan ka gaari doono ogolaashada ama ogolaasho la'aanta qorshaha ardayga ee barnaamijka kaalmada.
3. Haddii ardayga waafaqo in uu raaco barnaamijka kaalmada mukhaadaraadka/qamrada, isaga/iyada waa in uu maareyaha atleetikada/hawlahaama agaasimaha ama qofka uu magacaabo u gdubiyocaddeyn ku saabsan:
  - a) Ka-qeybgalka lagu guuleystay, sida uu go'aan uga gaaray agaasimaha ama qofka uu magacaabay/atleetikada/hawlaha agaasimaha, barnaamijka kaalmada mukhaadaraadka/qamrada ama ka qeybgalka dayactirka mukhaadaraadka/qamradah dugsiga ogolaaday ama barnaamijka la-tallinta;
  - b) Ballan qaad socda in aan la isticmaalin mukhaadaraadka/qamrada.
4. Haddii qofka iska xaadiriyo xaflooda, waa la dhaafi doonaa aqoonsiga iyo/ama ciqaabta abaal marrinta haddii ardayga tagay ama sameyay qorsho uu ku tago barnaamijka kaalmada.
5. Ardayga jebiya looma ogolaan doono in uu qabto boosaska hoggaaminta muddada hawsha manhajka dheeraadka ah ee iminka socda ama midda ku xigta ama xiliga hadba sida uu go'aan u gaaro agaasimaha. Isaga/iyada looma ogola in ay tagto xaflooda/xuska abaal marrinta. Ka qeybgalaha ma qaadan karo abaal marrin, warqado, ama aqoonsi xagga ka-qeybgalka xilliga iminka socda ama midka xiga, haddii uusan iminka ka qeybgelin hawsha dheeraadka manhajka.

### Jebinta Labaad

1. Ardayga jebiya Sharciga 1 mar labaad ama marka lagu daro mar labaad waxaa laga mamnuuci doonaa ka-qeybgalka hawlaha manhajka dheeraadka ah muddo hal (1) sanno kalendarka laga bilaabo taariikhda jebinta.
2. Haddii ardayga waafaqo in uu raaco barnaamijka kaalmada mukhaadaraadka/qamrada ama tago qiimeynta mukhaadaraadka/qamrada la ogolaaday iyo barnaamijka daweynta aysan maal gelinin Westerville City School District, ciqaabta waxaa boqolkiiba qonton (50% tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA), lagana dhimi doono laga yareyn doonaa hawsha manhajka dheeraadka ah ee iminka socota ama socon doonto xilliga muddada ama xilliga xiga. Muddada ciqaabta kaddib, ardayga wuxuu codsi u jeedin karaa agaasimaha, si loo qabto dhageysi ku saabsan ku soo noqashada ka-qeybgalka. Ardayga kama qeybgeli doono manala safri doono kooxda ama kooxda balaaran waqtiga ka-joojinta.
3. Ardayga waa in uu la kulmo guddiga fiirinta iyo xubinta (xubnaha) ka tirsan kooxda kaalmada ardayga, lana keeno caddeynta:
  - a) In uu ku guuleystay (ama ka-qeybgalka sii socda) barnaamijka dayactirka mukhaadaraadka dugsiga ogolaaday/qamrada ama barnaamijka la-tallinta;
  - b) Ballan qaad socda in aan la isticmaalin mukhaadaraadka/qamrada.
4. Guddiga fiirinta waxay ku tallin doontaa ogolaasha ama ogolaasho la'aanta codsiga, oo laga yaabo in ay ku jiraan sharuudo dheeraad ah (sida ka-qeybgalka kaalmada asxaabta ama wakaalad kale oo la ogol yahay taasoo qaabilsan daryeelka muikhaadaraadka ama qamrada ama barnaamijka la-tallinta).
5. Ardayga jebiya looma ogolaan doono in uu ka shaqeeyo boosaska hoggaaminta muddo hal sanno. Isaga/iyada looma ogolaan doono in ay tagto xaflooda abaal marrinta/xuska, ama ardayga lama siin doono abaal marrin, warqado, ama aqoonsi la xariira ka-qeybgalka xilliga iminka socda ama xilliga ku xiga haddii aysan iminka ka qeybgelin hawsha manhajka dheeraadka ah.

### Jebinta Saddaxaad

1. Maamulaha ama qofka loo magacaabo wuxuu hirgelin karaa in uu si joogto ah uga joojiyo ka-qeybgalka hawlaha manhajka dheeraadka ah inta ka hartay hawsha waxbarashada ardayga. Go'aanka Maamulaha ama qofka loo magacaabay waa kama dambays.

### **SHARCIGA II. LAMA OGOLA GUDBINTA, ISKUDAYIDDA GUDBINTA AMA IIBINTA MUKHAADARAADKA AMA QAMRADA.**

### Jebinta Kowaad

1. Ardayga jebiya waxaa laga mamnuuci doonaa ka-qeybgalka dhamaan hawlaha manhajka dheeraadka muddo hal (1) sanno kalendarka laga bilaabo taariikhda jebinta.
2. Haddii ardayga geystay jebinta waafaqo in uu raaco barnaamijka kaalmada mukhaadaraadka/qamrada ama in uu tago barnaamijka qiimeynta iyo daweynta mukhaadaraadka/qamrada dugsiga ogolaaday, kaasoo uusan maal gelinin Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville, ciqaabta waxaa boqolkiiba qonton (50% tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA), lagana dhimi doono hawsha



manhajka dheeraadka ah ee iminka socota ama ku xigta ama xilliga. Muddada ciqaabta kaddib, ardayga wuxuu codsi u jeedin karaa agaasimaha ama qofka uu u magaacabay iyo maareyaha atleetikada/hawlaha, si loo qabto dhageysi ku saabsan ku soo noqoshada ka-qeybgalka. Ardayga kama qeybgeli doono mana la safri doono kooxda ama kooxda balaaran waqtiga ka-joojinta.

3. Ardayga waa in uu la kulmo guddiga fiirinta iyo xubin (xubnaha) ka tirsan kooxda kaalmada, lana keeno caddeynta:
  - a) in lagu guuleysto dhamaystirka (ama ka-qeybgalka sii socda) dayactirka mukhaadaraadka dugsiga ogolaaday ama barnaamijka la-tallinta;
  - b) ballan qaad socda in aan la isticmaalin mukhaadaraad.
4. Guddiga fiirinta waxay ku tallin doontaa ogolaasha ama ogolaasho la'aanta codsiga, oo laga yaabo in ay ku jiraan sharuudo dheeraad ah (sida ka-qeybgalka kaalmada asxaabta ama wakaalad kale oo la ogol yahay oo qaabilsan daryeelka muikhaadaraadka ama qamrada ama barnaamijka la-tallinta).
5. Marka qofka is xaadiriyo, waxaa laga dhaafi doonaa ciqaabta xafladda, aqoonsiga iyo/ama abaal marrinta haddii ardayga tagay ama sameyay qorsho uu ku tago barnaamijka kaalmada.
6. Ardayga jebiya looma ogolaan doono in uu ka shaqeeyo boosaska hoggaaminta muddo hal sanno. Isaga/iyada looma ogolaan doono in ay tagto xafladda abaal marrinta/xuska, ama ardayga lama siin doono abaal marrin, warqado, ama aqoonsi la xariira ka-qeybgalka hawsha manhajka dheeraadka ah.

#### Jebinta Labaad

1. Maamulaha ama qofka loo magacaabo wuxuu hirgelin karaa in uu si joogto ah uga joojiyo ka-qeybgalka hawlaha manhajka dheeraadka ah inta ka hartay waxbarashada ardayga. Go'aanka Maamulaha ama qofka loo magacaabay waa kama dambays.

SHARCIGA III. LAMA OGOLA ISTICMAALKA, IIBINTA AMA HAYSASHADA TUBAAKADA NOOC KASTA.

#### Jebinta Kowaad

1. Ardayga jebiya waxaa laga mamnuuci doonaa ka-qeybgalka hawlaha manhajka dheeraadka ah ilaa boqolkiiba labaatan (20% tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeyso OHSAA) dhamaan munaasbadaha laga bilaabo taariikhda jebinta.
2. Halkeeda ayaa lagu hayn doonaa ciqaabta haddii:
  - a) Ardayga waafaqo in uu ka qeybgalo barnaamijka waxbarashada tubaakada uu soo ogolaaday agaasimaha dugsiga ama qofka loo magacaabay. Diidmada ama in aan la dhamaystirin barnaamijka dhallin doonto in lagu dabaqo ciqaabta oo buuxda. Ardayga wuxuu ka qeybgeli karaa, wuxuu ka tartami karaa iyo wuxuu la safri karaa kooxda ama kooxda balaaran waqtiga ka-joojinta.

#### Jebinta Labaad

1. Ciqaabta waxay ahaan doontaa boqolkiiba afartan (40% tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeyso OHSAA) mamnuuca ka-qeybgalka, taasoo yareysa ilaa boqolkiiba labaatan (20% tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeyso OHSAA) haddii ardayga raaco sharuudaha yareynta kore. Ardayga wuu ka qeybgeli

karaa, wuu safri karaa, balse ma tartami karo ama wax lama fullin karo kooxda ama kooxda balaaran waqtiga ka-joojinta.

Jebinta Saddaxaad ama ka badan

1. Maamulaha ama qofka loo magacaabay wuxuu ardayga ka joojin karaa ka-qeybgalka boqolkiiba konton (50% tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeyso OHSAA) hawsha manhajka dheeraadka iminka ama midda xigta. Muddada ciqaabta kaddib, ardayga wuxuu ku dhaqmi karaa/ka qeybgeli karaa iyo wuxuu la safri karaa kooxda ama kooxda balaaran waqtiga ka-joojinta.

**Xeerka Asluubta Manhajka Dheeraadka ah  
Sharciyada iyo Jadwalka Ciqaabta**

	JEBINTA 1AAD	JEBINTA 1AAD WAXAA LA SOCDA AP	JEBINTA 2AAD	JEBINTA 2AAD WAXAA LA SOCDA AP	JEBINTA 3AAD
<p><b>SHARCIGA I</b></p> <p>Lama ogola isticmaalka, xumaanta, iibsiga ama haysashada mukhaadaraadka ama qamrada.</p>	RC	P:	RC	P:	RC
<p>1 Sanno (12 bil) ka joojinta dhamaan hawlaha manhajka dheeraadka ah.</p>	<p>Yareynta 20% (tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA) xilliga iminka jira ama ku soo xiga.</p>	<p>1 Sanno (12 bil) ka joojinta dhamaan hawlaha manhajka dheeraadka ah.</p>	<p>Yareynta 50% (tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA) xilliga iminka jira ama ku soo xiga.</p>	<p>Ka-joojinta suurtoogalka ah inta ka hartay waxbarashada.</p>	
<p><b>SHARCIGA II</b></p> <p>Lama ogola gudbinta, iskudayidda gudbinta ama iibinta mukhaadaraadka ama qamrada.</p>	RC	P:	RC		
<p>1 Sanno (12 bil) ka joojinta dhamaan hawlaha manhajka dheeraadka ah.</p>	<p>Yareynta 50% (tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA) xilliga iminka jira ama ku soo xiga.</p>	<p>Ka-joojinta suurtoogalka ah inta ka hartay waxbarashada.</p>			
<p><b>SHARCIGA III</b></p> <p>Lama ogola isticmaalka, haysashada ama gudbinta tubaakada hab kasta.</p>	RC	P:	RC	P:	RC
<p>20% (tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA) yareynta xilliga dhamaan hawlaha manhajka dheeraadka ah.</p>	<p>Yareynta xilliga aan la isticmaalin.</p>	<p>40% (tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA) yareynta xilliga.</p>	<p>20% (tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA) yareynta xilliga.</p>	<p>Yareynta 50% (tartanka ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeeyso OHSAA) xilliga iminka jira ama ku soo xiga.</p>	

RC = Go'aanka Review Committee (Guddiga Fiirinta)    P = Go'aanka Agaasimaha  
AP = Barnaamijka Kaalmada

Ardayga jebiya looma ogolaan doono in uu qabto boosaska hoggaaminta muddo hal sanno. Isaga/iyada looma ogolaan doono in ay tagto xafladda abaal marrinta/xuska, ama ardayga lama siin doono abaal marrin, warqado, ama aqoonsi la xariir ka-qeybgalka xilliga iminka socda ama xilliga ku xiga haddii aysan iminka ka qeybgelin hawsha manhajka dheeraadka ah.